

Wakiilka (God man) caruurta kaligood yimaada

Caruurta timaada Iswiidhen iyaga oo aan la socon waalidkood waxey badanaa u baahan yihiin qof metela, tusaale ahaan marka lala xiriirayo hey'adaha kala duwan. Qof ehel la ah ma meteli karo "ilmo kaligii yimid" sidaa darteed waa in loo sameeyaa wakiil.

Wakiilka ilmaha kaligood yimaada, wuxuu metelayaa ilmaha isagoo u shaqeynaya sida mas'uul xanaano iyo wakiilka sharci (*förmyndare*). Waxa loola jeedaa in wakiilku mas'uul ka yahay isla markaana go'aan ka gaarayo arimaha shaqsiyadeed iyo kuwa dhaqaale ee ilmaha. Wakiilka mas'uul kama ah daryeelka maalmeed ee ilmaha isla markaana mas'uul kama aha masruufka ilmaha.

Waa muhim in lala socdo in wakiilku aanu ka socon hey'ad dowladeed. Waxaa loola jeedaa tan in wakiilku aanu ka socon hey'ad balse uu metelayo ilmaha. Guud ahaan waxa la oran karaa in wakiilku ka shaqeeyo in ilmuhu helo gargaarka uu isagu u baahan yahay waqtiga uu ku cusub yahay Iswiidhen.



Shaqada wakiilka

Wakiilku wuxuu ka shaqeeyaa arimaha:

- Taageerada ilmaha ee xiriirka hey'adda Socdaalka iyo inuu joogo xilliga wareysiga.
- Dalabka deeqaha markaa jira (tusaale ahaan deeqda waxbarashada, tan caruurta, tan xafiiska arimaha bulshada).
- Ka shaqeynta in ilmuhu helo degaan u shaqeynaya sidi loogu tala galay.
- Ka shaqeynta in ilmuhu helo daryeel caafimaad marka loo eego baahida ilmaha.
- Ka shaqeynta in ilmuhu helo iskuul u shaqeynaha sidi loogu tala galay.
- Ka shaqeynta in ilmuhu, haddii ay macquul tahay, la xiriiro waalidkiis ama ehelkiisa ku sugan dalkiisa.

Hey'adda baarta baahida wakiilka

Waxa kammuun kasta ee Iswiidhen ka jirta hey'adda baarta baahida wakiilka. Hey'addan ayaa baarta baahida wakiilka (god man) isla markaana go'aamisa xulidda wakiilada ee caruurta kaligood yimaada. Hey'addan ayaa mas'uul ka ah la socoshada howlaha wakiilka isla markaana bixisa dhaqaalaha ku baxa wakiilka.

Xiriir/Su'aalo

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan arimaha wakiilka fadlan nala soo xiriir.